


# DHISMAHA KHIDADA KA **bixitaanka dhaqaale**

**Hadi aad is aragto inaad ka tegeyso xidhiidh mudo dheer ah, dhismaha khidada ka bixitaanka dhaqaale waa talaabo muhiim ah. Waa tan dhawr shay oo ay tahay in la isla eego:**

**Hadi aad is aragto inaad ka tegeyso xidhiidh mudo dheer ah, dhismaha khidada ka bixitaanka dhaqaale waa talaabo muhiim ah. Waa tan dhawr shay oo ay tahay in la isla eego:**

- Qiimaynta iyo liis garanaynta dhamaan xisaabaadka bangiga, kuwa la wada leeyahay iyo kuwa gaar ah.  Waxa aad haysataa duwaanka dhamaan lambarada xisaabaadkaaga bangiga iyo magacyada xisaabaadka iyo sidoo kale baaqiga wakhtigan.
- Xasuuso, xisaabaadka la wada leeyahay waxa la idiin qaybin karaa adiga iyo lamaanahaaga.  Xaqiiji inaad heli karto xisaabta xataa hadii aanad ahayn qofka kowaad ee ku qoran xisaabta.
- Hadii aad leedihiin xisaab wadared ama dayn ku wada jirtaan, waxa aad liis garasaa dhamaan daymaa oo ay ku jirto magaca cida daynta laga qaatay, lambaka xisaabta, magaca xisaabta iyo baaqiga la idin ku leeyahay.
- Akhri duwaankaaga daynta si ayna waxba kuugu dhuuman. Waxaa weeye iminka wakti wanaagsan oo ay tahay inaad iska duwaan geliso Equifax iyo TransUnion.
- La soco waxa socda oo ka bax xisaabaadka la wada leeyahay.

- Badal dhamaan baaswoodhadaada bangiyada. Maadaama oo bangiyada qaar ay istimcaalaan iimeelkaaga si loo xaqiijiyo, badal baaswoodhka iimeelkaaga sidoo kale. Hadii aad kaliya aad iimeelka wadaagtaan xaaskaaa, furo iimeel cusub oo magacaaga ah oo aad kaligaa leedahay.
- Hadi aad leedahay guri, waxaa weeye wakhtigii ay ku haboonayd inaad qiimayso gurigaaga. Sidoo kale, waxa aad ogaataa inta weli bangigu ku leeyahay.
- Hadii aad leedahay sanduuq wadareed aad wax ku wada kaydsataan, waxa aad ka saartaa shayada ku jira ama waxa aad ka samaysataa nuqul hadii aan laguu ogolayn inaad ka saarto ama inaad sidaa samaysaa ayna amaan kuu ahayn.



# OGGOW DAKHLIGAAGA IYO KHARASHKA NOLOSHAADA EE MUSTAQBALKA

- Qiyaas kharashkaaga cusub ee noloshaada. Tani waxay la xidhiiidhaa baadhitaanka guryaynta ama kharashka kirada ee bulshada aad qorshaynayso inaad degto.
- Dhis miisaaniyad ay ku jirto wax kasta oo aad ugu baahan tahay noloshaada cusub. Dadka qaar ayaa badanaa ilooba kharashaadka sida Nexflix, barkinka ama hadyadaha.
- Hadii aad leedahay caruur, biilka caruurta ayay tahay in la eego. Hadii ilmahaaga(caruurtaada) ay marka hore adiga kula degayaan, xaaskaaga waxaa looga baahan yahay inay bixiso biilka caruurta.
- Oggow, xadiga biilka ilmaha ee aad heleyso waxaa saamayn ku yeelan kara xadiga wakhtiga ilmaha(caruuta) ay la joogayso waalidka kale.

WAXA AAD DALBAN KARTAA BIILKA XAASKA. MAXKAMADU WAXAY EEGI KARTAA DHAWR SHAY OO AY KU JIRAAN, LAAKIIN AAN KU KOOBNAYN:

- Mudada guurka ama xidhiidhka.
- Baahida dhaqaale iyo xaalada dhinac walba.
- Hadii la saxeexay kafaale qaadida soo galaytiga iyo in kale.

## OGGOW DAKHLIGAAGA IYO KHARASHKA NOLOSHAADA EE MUSTAQBALKA

- Xataa haidi aad leedahay guriga oo aad qorshaynayso inaad iibsato mid kale, waxaa daruuri noqon karta inaad mudo kooban kiraysato guri.
- Oggow: iyada oo ku xidhan xaaladaada dhaqaale, waxaa kugu khasab noqon karta inaad bixiso biilka ilmaha iyo/ama biilka xaaska.
- Hadii aanu dakhligaaga wakhtigan aanu ku filnayn inuu buuxiyo baahiyahaaga, waxaa lagaaga baahan karaa inaad eegto qaab aad ku kordhiso dhaqaalahaaga.
- Hadii aanad lahayn dakhli, waxaa muhiim ah inaad ka fikirto sida aad u buuxinayso baahiyahaaga aas aasiga ah ee mudada gaaban. Inaad doondoonato shaqo iyo inaad doonato taageero qoys ayaa noqon kara ikhtiyaaro aad eegi karto. Dalbo kaalmo bulsho oo aad ku dalbanayso Ontario Works taas oo iyana ah ikhtiyaar.
- Hadii lagu dalacsiiyay shaqada, waxa aad dalbataa in mushaharka laguu kordhiyay laguugu shubo xisaabtaada bangiga ee cusub. Sidaas oo kale samee hadii aad mushahar saacado dheeraad ah oo shaqo aad hesho.

## OGGOW DAKHLIGAAGA IYO KHARASHKA NOLOSHAADA EE MUSTAQBALKA

Hadii aad leedihiin xisaab wadareed oo kaliya, **ka furo xisaab kuu gaar ah bangi cusub.** Xisaab bilaash ah oo bangiga onlineka ah ayaa buuxin karta bahidaada.

Marka aad yeelato xisaabta **bangiga cusub waxa aad u wareejisaa dakhligaaga oo dhan xisaabtaas** sida, mushaharka iyo gunooyinka daryeelka ilmaha dawlada.

Waxa aad isku daydaa inaad ku dalbato kaadhka daynta xisaabta magacaaga oo kaliya ku qoran yahay.

**Hadii aanad furan karin xisaab bangi oo cusub, waxa aad dhigataa lacag cadaan ah oo waxa aad ka dalbadaa saaxiib aad ku kalsoon tahay ama xubin qoys inay kuu hayso.** Hadii aad dhiganayso $5 ama $50 bishii, waxaa muhiim ah inaad lacag dhigato. Waxaad ugu baahan kartaa lacagtan inaad ku bixiso kharashka guurista ama inaad deebaajiga kirada ka dhigato.

*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

**Family Services Ottawa** | 312 avenue Parkdale Ave. Ottawa ON K1Y 4X5
**info@familyservicesottawa.org** | T. 613-725-3601 **Translated into Somali*